

# Ka hortaga Takoorka Timaha

Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota (MDHR) waxa ay odorsaysaa adduun uu qof kastaa ku noolaan karo nolol ay ka buuxaan sharaf iyo farxad, kana madax banaan takoor. Sida uu qabo Xeerka Xuquuqul Insaanka ee Minnesota, dadka reer Minnesota waxay xaq u leeyihiin inay ku muujiyaan aqoonsigooda qowmiyadda iyagoo isticmaalaya timaha dabiiciga ah iyo qaabaynta iyadoo aan lagu takoorin.



## Wuxuu yahay Sharcigu?

Janaayo 31, 2023, Gudomiye Walz wuxuu saxiixay sharciga CROWN oo uu sharci ka dhigay. Sharciga CROWN Act wuxuu xaqiijinayaa ka hortagga takoorka ku salaysan nooca timaha dabiiciga ah iyo qaabayntooda sida dabashada timaha, tidica, iyo qalloocinta iyada oo loo eegayo Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota.

### Halkee ayaa Sharciga lagu dabaqayaa?

Meel kasta oo uu ka shaqeeyo Xeerka Xuquuqul Insaanka Minnesota.



Iskuulada



Guryaha



Goobaha shaqada



Bangiyada



Makhaayadaha



Ganacsiyada



Dukaamada



Dhismayaasha Dowladda

### Tusaalooyinka Takoorka timaha

- Loo shaqeeyaha ayaa shaqada ka erya shaqaale Madow ah maadaama oo uu timaha dabanyahay.
- Iskuulkaayaa wuxuu ku qasbaa ardayda Madowga ah inay xiiraan tidicooda timaha ama ay lumiyaan ciyaarta.
- Makhaayad ayaa u diiday in ay soo galaan lamaane Madow ah oo timo tidcan sababtoo ah xeerhooda makhaayadda ayaa ah in macaamiishu ay “si fiican u labbistaan.”

## Siyaabaha loo dhiso Minnesota loo wada dhan yahay si looga hortago Takoorka

Loo-shaqeeyayaasha, iskuulada, mulkiilayaasha guryaha, iyo ganacsiyada dhamaantood waxay leeyihiin door ay ku ciyaaraan marka ay timaaddo abuurista goobo loo dhan yahay oo ka madax banaan takoorka dadka reer Minnesota. Hoos waxaa ku yaalla siyaabaha qaar ee looga hortagi karo takoorka timaha.

1

**Abuurta Xeerar Adag:** Abuurta oo qaybiya xeerar taageeraya nooca iyo qaabka timaha dabiiciga ah oo mamnuucaya takoorka qomiyadeed. Haddii ay jiraan xeerar ku salaysan caafimaadka iyo badbaadada, sida in loo baahanyahay in timaha la xiro ama la geliyo shabaq, xeerarkaas waa in si siman loogu dabaqo dhammaan qaababka iyo noocyada timaha.

2

**Bixiya Tababaro Macno Leh:** Ku tababara shaqaalaha xeerarka mamnuucaya takoorka jinsiyadda, oo ay ku jirto takoorka timaha, oo ku tababara shaqaalaha muhiimada ay leedahay in si ula kac ah loo abuuro goobo loo wada dhan yahay, oo ka madax banaan takoorka.

3

**Dhaqangeliya Xeerarka:** Dhaqangeliya xeerar mamnuucaya takoorka jinsiyadda, oo ay ku jiraan takoorka timaha, iyo in lala xisaabtamo horjoogayaasha iyo shaqaalaha inay ku guul daraysta inay soo sheegaan ama ka hadlaan takoorka ama dhibaataaynta.

## Takoor miyaa la kulatay?

Kala soo xiriir Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota [mn.gov/mdhr](http://mn.gov/mdhr) ama soo wac 1-833-454-0148.